



## **Waxaa la gaaray wakhtigii boos iskuul laga dalban lahaa!**

Bisha agoosto 2021 wuxuu ubadkaaga bilaabi doonaa fasalka toddobaad, sidaas awgeed waxaa la gaaray wakhtigii boos iskuul laga dalban lahaa. Kala xulashada iskuullada waxaa loogu dhaqaaqa iyadoo xilhaayaha xannaanadda/waalidka, adeegsanayo farsamada aqoonsiga digitalka ee loo yaqaanno [e-legitimation] iyo hab-dhiska [Mitt Skolval]. Sidii codsiga looga arrinsado dartiisa haddii ubadkaaga u leeyahay laba xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta, waa in labadooda ba ay raali ka yihiin kala xulashada iskuullada. Markii hab-dhiska albaabada loo furayo, waxaa warqad la idinku soo diri doonaa boostada.

## **Su'aallo iyo jawaab xiriir la leh Kala xulashada iskuullada**

### **Maxay tahay sababta aan ubadkayga iskuul u dalbanayo?**

– In adiga oo ah xilhaayaha xannaanadda/waalidka lagu siiyo fursad dheeraad oo aad saamayn ku yeelato iskuulka ubadkaaga u dhigan doono.

### **Sidee buu nidaamkaan ugu duwan yahay kuwii berri hore?**

– Ilaa sannakda markii u ahaa 2019, waxaa ardayda toos boos looga siin jiray iskuulka u dhow halka goyskiisa u degan yahay. Xilligaas waalidku uma baahnayn in ubadkiisa iskuul u dalbado haddii u ku qanacsanaa iskuulka boos ubadkiisa laga siiyay. Haseyeeshe, waayahaan dambe waa in dhammaan xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta oo leh ilmo bilaabi doonaan fasalka dugsiiga xannaanadda ama fasalka toddobaad, ilmahooda iskuul u xushaan.

### **Fursad aan iskuullada ku booqdo kala xulashada kahor soo layma siinayo?**

– Bilowga bisha jannayo waxaa la qorshayn doonaa kulamada warbixinta. Waa haddii hab sugan oo ka qaybgaleyaasha goobjoog yihiin la hirgelin karo. Maamullada iskuullada waxay imminka ka arrinsanayaan haddii suurtagal ay noqon karto, in warbixin iskuullada ku saabsan iyo tusida goobaha lagu dhaqaaqi karo iyadoo la adeegsanayo farsamada digitalka ku salysan. Warbixin dheeraad ayaa heli doontaan.

### **Haddii boos aan iskuul ka dalban, maxaa dhici doono?**

– Haddii xilhaayaha xannaanadda/waalidka usan ubadkiisa boos uga codsan iskuul, waxaa lagu meelayn doonaa iskuul ku yaallo goob guriga u dhow, laakin lama ballan qaadi karo in u yahay kan ugu dhow.

### **Kala xulashada iskuullada ma khuseeysa ilmaha dhigta ama dalban doonaan in ay dhigtaan iskuullada madaxbannaan?**

– Haa. Ilmaha boos ka dalban doonaa iskuullada madaxbannaan waa in ay kala xushaan. Laakin dhammaan iskuullada madaxbannaan ma isticmaalaan hab-dhiska. Haddii aad ku talo jirtaan in boos aad iskuullada madaxbannaan aan hab-dhiska isticmaalin ka codsato, waa in toos aad maamulka iskuulkaas la xiriirtaan. Sidoo kale, haddii boos aad ka doonayn dugsiyada Dowladda hoose



maamusho, waa in xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ay maamulka degmada wargeliyaan, emailka waa: [info@vaxjo.se](mailto:info@vaxjo.se).

Ogeysiis, haddii cunugga aan boos laga siin iskuulka madaxbannaan, oona boos looga dalban iskuullada Dowladda hoose ay maamusho waxaa cunugga lagu meelayn iskuullada Dowladda hoose ay maamusho ee boos looga heli karo.

### **Haddii tirada codsadeyaasha ay ka badan tahay boosaska la heli karo, sidee baa wax la yeela?**

– Haddii tirada codsadeyaasha ay ka badan tahay boosaska la heli karo, waxaa loo kala mudaan siiyaa qaabka hoos ku xusan:

1. Ardayga tobanka lambar aqoonsigiisa sugan/sirta ah leh.
2. Ardayga walaalahiisa isla waaxdaas dhigtaan.
3. Ardayga hoygiis aad iskuulka ugu dhow.

### **Ma layga damaanad qaadi karaa in ubadkayga boos laga siin doono iskuulka aan u codsaday?**

– Dhammaan carruurta waxay helaan ku meelayn wanaagsan hadba iskuullada waaldiintooda u codsadeen. Iskuulka lagu meelayn doono waa hadba xaalado kala duwan oo badan. Haddii tirada codsadeyaasha ay ka badan tahay boosaska iskuulka laga heli karo, waxaa ardayga lagu meelayn doonaa hab waafaqasan nidaamka maamulka u degsan, ardayga walaalahiisa iyo sida iskuulka iyo hoyga ardayga isugu dhow yihiin.

### **Wa maxay isku dhowaashada hoyga iyo iskuulka?**

– Isku dhowaashada hoyga iyo iskuulka waxaa loola jeeda, in ardaygu u xaq ku leeyahay in boos laga siiyo iskuulka hoygiisa u dhow, laakin mar kasta ma ahan kan aad ugu dhow. Haddii tirada codsadeyaasha ay ka badan yihiin boosadka iskuulka laga heli karo, waxaa mudnaanta koowaad la siiyaa ardayga hoygiisa iskuulka ugu dhow. Warbixin dheeraad ku saabsan hadba u dhowaashada iyo hab-shaqayntiisa waxaad ka aqrisan kartaa [www.vaxjo.se/skolval](http://www.vaxjo.se/skolval)

### **Xulasho istraatejiyad ku salaysan ma la sameeyn karaa?**

– Maya. Markii laga arrinsanayo hadba u dhowaashada, waxaa fiirogaar la siiyaa sida iskuulka ardayga u dhigan doono iyo hoygiisa isugu dhow yihiin, ee ma ahan iskuulka xulasho labaad ahaan loo doortay. Haddii wax iskuul ah aadan xulan waxaa boos la idinka siinyaa iskuulka boos ka bannaan.

### **Haddii imminka ubadkayga u iskuul ka dhigto fasalka lexaad, kaasoo laga helo fasalka toddobaad ma ku qasban nahay in aan isla fasalkaas dalbanno?**

– Ubadkaaga wuxuu sharci ahaan xaq ku leeyahay in uu dhigto isla iskuulkaas. Sidaas awgeed, anagu kuma meelayn doono iskuul kale waa haddii idinka aanan codsan arrintaas. Iyadoo sidaasi tahay haddana waa in isla iskuulkaas aad u xulataan idinkoo adeegsanayo adeegyada farsamada digitalka ku salaysan [e-tjänsten]. Haddii idinkoo hab-dhiska adeegsanayo aynan codsan iskuul kale, isla iskuulkaas ayuu ubadkiinna dhigan doonaa.



## **Sidee baa loo dalbada Dugsiyada biloowga/hoose/dhexe [Växjö International Baccalaureate grundskola] ama iskuulka [Fagrabäckskolans natur- och teknikinriktning]?**

– Dalbashada Dugsiyada biloowga/hoose/dhexe [Växjö International Baccalaureate grundskola] ama iskuulka [Fagrabäckskolans natur- och teknikinriktning] waxaa loogu dhaqaaqa isla sida loo codsado iskuullada kale ay dowladda hoose maamusho. Xulashada waxay ku salaysan tahay mudnaan-siinta walaalaha kaddib bakhtiyaa-nasiib. Sababta bakhtiyaa-nasiib loo adeegsanayo ayaa waxay tahay in dhammaan ardayda la siiyo fursad siman ay iskuulladaas ku heli karaan, iyadoo fiirogaar aan la siin halka degmada ay ka degan yihiin.

Dhammaan ardayda buuxin kara shuruudaha musaafada, oo boos laga siiyay Dugsiyada biloowga/hoose/dhexe [Växjö International Baccalaureate grundskola] ama iskuulka [Fagrabäckskolans natur- och teknikinriktning] waxaa loo oggol yaha gaadiidka iskuullada haddii ay lahaayeen iskuullada leh gaadiidka iskuullada.

## **Goormaa kala xulashada iskuullada lagu dhaqaaqa?**

– Fursadda kala xulashada iskuullada waxay bilaaban doontaa laga bilaabo markii taariikhda ay ku beegan 15 jannayo 2021, waxaana la soo gabagabaynayaa markii taariikhda ay ku beegan 31 jannayo 2021 iyadoo la adeegsanayo [Mitt Skolval] [www.vaxjo.se/skolval](http://www.vaxjo.se/skolval)

## **Sidee baa loo hirgeliyaa?**

– Xilhaayaha xannaanadda/waalidka ee ubadkiisa bilaabi doono fasalka toddobaad ama ama fasaka toddobaad ee xilliga dugsi-dhigashada ee dayrta 2021, waxaa bisha jannayo 2021 loo soo diri doonaa warqad ku qoran wargelinta fursadda kala xulashada iskuullada. Kala xulashada iskuullada waxay xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ku sameeyn karaan iyadoo adeegsada aqoonsiga digitalka ee loo yaqaanno [e-legitimation] [Mitt Skolval] ee barta internetka laga helo [www.vaxjo.se/skolval](http://www.vaxjo.se/skolval)

## **Haddii aqoonsiga digitalka ee loo yaqaanno [e-legitimation] aan haysan maxaan sameeyaa?**

– Xaaladdaas waxaad isticmaali kartaa foom. Kala xiriir Xarunta xiriiryada [kontaktcenter] ee maamulka degmada [info@vaxjo.se](mailto:info@vaxjo.se) ama 0470-41000.

## **Haddii aan iloowo in ubadkayga aan iskuul u dalbado, maxaa dhici doono?**

– Xaaladdaas ubadkaaga waxaa lagu meelayn doonaa iskuul degmada ku yaallo, laakin waxaa dhici karto in usan ku oolin goobta ugu dhow guriga ardayga.

## **Haddii anaga oo ah xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta aan ku heshiin karin xulashada iskuulka ubadkayga u dhigan lahaa maxaa dhici doono?**

– Haddii ardaygu u laba adrees leeyahay, waxaa lagu meelaynayaa iskuul ugu dhow adreeska u rasmi ahaan [folkbokföringsadressen] ka diiwan gashan yahay. Haddii xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta aynan ku heshin karin iskuulkii ubadkooda u xulan lahaayeen, waxaa cunugga lagu meelaynayaa iskuul ugu dhow adreeska u rasmi ahaan ka diiwan gashan yahay. Haddii xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ay ku talo jiraan in adreeska rasmiga wax ka beddelaan waa in arrintaas ay kala xiriiraan Hay'adda arrimaha canshuuraha [Skatteverket]. Ogeysiis in haddii



xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ay hoosta ka saxiixin foomka codsiga ee kala xulashada, waxaa codsiga noocaas ah loola dhaqmi doonaa sidii idinkoo wax iskuul ah uabdkinna u xulan.

### **Goorma nala wargelin doonaa go'aanka kala xulashada?**

– Go'aanka kala xulashada waxaa xilhaayeha xannaanadda/waalidka loo soo diri doonaa bilaha maarso/abriil 2021.

### **Haddii aan ku qanacsanayn iskuulka boos nalaga siiyay, maxaan sameeyn karnaa?**

– Codsashada iska beddelka iskuulka. Foomka halkaan ayaa laga helaa [www.vaxjo.se](http://www.vaxjo.se)

### **Soo mudnaantaa koowaad ubadkayga lama siiyo haddii walaalahiisa ay isla iskuulkaas dhigtaan?**

– Haa, haddii cunugga u dhigto iskuulka la xushay, oona Xilliga dugsi-dhigashada ee dayrta 2021 u dhigan doono isla waaxda iskuulka oo hadda aad u xusheen. Mudnaan-siinta xiriir la leh ilmaha isku qoys ka tirsan ma hirgasho haddii ilmahu u ka gudbi doono xilliga dugsi-dhigashada ee dayrta 2021. Ogeysiis Dugsiyada bilowga/hoose/dhexe waxay leeyihiin waxyo badan oo kala duwan.

### **Ma ogaan karaa iskuulka ubadkayga u ku heli karo gaadiidka iskuullada?**

– Markii aad guda-galayso madasha [Mitt skolval] waxaa ku muuqan doono iskuullada leh gaadiidka iskuullada [skolskjutsskola]. Haddii iskuulladaas u dhigan doono oona buuxin karo shuruudaha u degsan ayuu heli karaa gaadiidka noocaas ah. Arday kasta wuxuu xaq ku lahaan karaa gaadiidka iskuullada xitaa haddii shuruudaha u degsan usan buuxnayn.

### **Haddii aan rabo in boqolkiiba ubadkayga gaadiidka iskuullada u helo, iskuul kee ayaan u xusha?**

– Haddii ardayga uu buuxin karo shuruudaha musaafada lagu helo gaadiidka iskuullada, oona qodobka ugu muhimsan u yahay helida gaadiidka iskuullada, xaalladdaas waa in la xusha iskuul leh gaadiidka iskuullada. Haddii ardayga boos aan laga siinin iskuul gaadiidka iskuullada leh, wuxuu ardaygu xaq ku leeyahay in gaadiidka iskuullada u helo u ku tago iskuulka lagu meeleeeyay.

Dhammaan wixii warbixin ah oo ku saabsan Kala xulashada iskuullada waxaa laga aqrisan karaa barta internetka [www.vaxjo.se/skolval](http://www.vaxjo.se/skolval)